

Shuruudka tijaabo-qaadista oo la si adkeeyey

Dawladdu waxa ay bilaabaysaa shuruud ku saabsan in dadka ay tijaabada degdegga ah ee xuduuddu sheegto in cudurka laga helay, kana yimi waddamo ka baxsan Aagga Dhaqaale ee Yurub iyo Aaga Schengen, in xuduudda lagaga qaado tijaabada PCR. Wuxuu kale oo la bilaabayaa shardi ku saabsan in qof kasta oo deggan hoteel karantiil uu tijaabada PCR iska qaado marka toddoba maalmo ka soo wareegto xilliga uu yimi. Degmooyinka waxa ku waajib noqonayaa in laga helo tijaabo noocaas ah.

Wax-ka-beddelkan waxa lagu saleeyey talooyin ka yimi Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha.

- Norway waxa ay leedahay mid ka mid ah nidaamyada ugu adag Yurub ee lagaga hortagayo is-qaadsiinta cudurka ee ka imanaysa waddanka dibeddiisa. Hadda waxannu soo rogaynaa xeerar intii hore ka sii adag oo ku saabsan tijaabo-qaadista. Sidaa waxa loo yeelayaa si loo yareeyo faafidda noocyada cusub ee fayruska oo ka is-qaadsiin fudud sidii hore, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Dadka aag karantiilkoo waajib noqonayo soo joogay xilli ka mid ah 10kii maalmo ee u dambeeyey waa in ay tijaabo iskaga qaadaan halka ay ka soo gudbayaan ee xuduudda Norway. Waa in tijaabadu noqoto nooca antigen ee degdegga ah. Wuxuu kale oo hadda la bilaabayaa shuruud ku saabsan in dadka ay tijaabada degdegga ah ee xuduuddu sheegto in cudurka laga helay, islamarkaana ka yimi waddamo ka baxsan Aagga Dhaqaale ee Yurub iyo Aaga Schengen, in laga rabo in tijaabada PCR na lagaga qaado xuduudda. Hadda ka hor waxa tijaabada PCR la iska qaadi karayey xilli ka mid ah 24ka saacadood ee u horreeya kadib marka la yimaado. Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa ay garteen in tallaabadii ay lagama maarmaan u tahay xakamaynta is-

qaadsiinta cudurka ee ka imanaya dibeddaha iyo si loo ogaan karo noocyoo cusub oo fayruska ah haddii ay yimaadaan.

Dadka ku jira karantiilka safarka ee aan joogin hoteel karantiil waxa ku waajib ah in ay maalinta toddobaad iska qaadaan tijaabo. Hadda waa la beddelayaa xeerarka si ay waajib ugu noqoto xataa dadka jooga hoteel karantiil. Degmooyinka waxa ku waajib ah in ay dadkaas siiyan fursad ay iskaga qaadaan tijaabo noocaas ah.

Wax-ka-beddelku waxa uu dhaqangal noqonaayaa saqda dhexe, habeenka khamiista 29ka Abriil.

Waxa kale oo waajib laga dhigay in ay hoteel karantiil joogaan dhammaan dadka safar ku imanaya ee soo joogay Bangaaladesh, Hindiya, Ciraaq, Nebaal ama Bakistaan iyadoo ay aad u yar yihii dadka laga dhaafi doono xeerarkani. Taas oo macnaheedu yahay in xataa dadka safar lagama maarmaan ah ku aaday waddamadaas ay waajib ku tahay in ay joogaan hoteel karantiil. Xeerarka soo gelista waddanka ee la sii adkeeyey ee khuseeya dadka ka imanaya waddamada la xusay waxa ay dhaqangal noqonayaan arbaca 28ka Abriil saacadda 12:00. Waa in ay hoteel karantiil galaan dhammaan dadka joogay waddamadaas xilli ka mid ah 10kii maalmood ee ka horreeyey markii ay soo galeen Norway.

Macluumaad kale oo ku saabsan nidaamka hoteel karantiil ee khuseeya safarleyda la soo sheegay ka eeg [halkan](#)